DEYNKA ALAAB GURI DHIGASHADA

FAKTABLAD CSN SOMALI

YAA DEYNSAN KARA MAXAASE LOO DEYNSADAA?

Qaxootiga iyo dadka ajaanibta ah qaarkood waxay codsan karaan deyn si ay guriga alaab ugu dhigtaan. Si aad deyn u heshid waa in aad tusaale ahaan ku jirtid qaabilaadda qaxootiga ama aad ku qorantihid Xafiiska xiriirka shaqada, aadna xaq u leedihid lacagta sal-dhigashada. Waa in aad sidoo kale buuxisay 18 sano marka markii ugu horreysay degmo laguugu soo dhaweeyay.

Deynka waxaa loogu tala galay in aad ku soo gadatid maacuun iyo alaab jiif iyo fadhi ah iwm. Lacagta looma isticmaali karo tusaale ahaa cunto iyo kiro.

GOORMEE AAN DEYNSAN KARAA?

Waxaad codsan kartaa deynta ugu dambeyn laba sano laga billaabo marka markii ugu horreysay degmo laguugu soo dhaweeyay. Waa sidaas xitaa haddii aad codsaneysid kordhin deyn aad horay u qaadatay.

IMMISA AYAAN DEYNSAN KARAA?

Inta deynta ah ee aad qaadan kartid waxay ku xirantahay qoyska weyninkiisa, haddii ay carruuri jirto qoyska, in aad guri firaashan kireysaneysid iyo in kale, ama haddii aad dad la deggantihid. Marwalba waa deynsan kartaa lacag ka yar inta ugu badan ee la deynsado. Haddii aad qof si qaab isqabitaan ah wadajir ula deggantahay (nin, xaas, qof aad wada nooshihiin ama lammaane) waa in aad deynka si wadajir ah isula dalbataan. Markaas si is-garabsi ah ayaad deynka mas'uul isagala noqoneysaan taasoo ka dhigan in labadiinno aad si wadajir ah mas'uul ugu tihiin in deynka dib loo dhiibo. Mas'uuliyaddaas si wadajir ah ayey idiin dul saarnaaneysaa xitaa haddii aad gadaal dambe is furtaan, aadna kala guurtaan.

Tiro Shakhsiyaad	Guri aysan alaab aallin Inta ugu badan lacagta oo koroon ah	Guri ay alaab taallo Qof la deggan cid kale
1 qof oo weyn	10 000	5 000
1 qof oo weyn + 1 canug	20 000	5 000
1 qof oo weyn + 2 carruur ah	25 000	5 000
1 qof oo weyn + 3 carruur ah	30 000	5 000
1 qof oo weyn + 4 carruur ah ama in ka badan	35 000	5 000
2 qof oo waaweyn	15 000	5 000
2 qof oo waaweyn + 1 canug	25 000	5 000
2 qof oo waaweyn + 2 carruur ah	30 000	5 000
2 qof oo waaweyn + 3 carruur ah ama in ka badan	35 000	5 000

SIDEE AAN DEYN KU CODSADAA?

Waxaad sida ugu fudud ugu codsan kartaa adiga oo caawimaad ka codsanaya gacanhayahaaga Xafiiska xiriirka shaqada ama qaabilaadda qaxootiga ee degmada.

Gacanhayuhu wuxuu kaa codsanayaa in aad codsi buuxisid, wuxuuna ku siinayaa warbixin ku aaddan xeerarka deynka. Gacanhayaha ayaa ka dib CSN u diraya codsiga.

HORAYBAAN U QAATAY DEYN, EE WAX DHEERAAD AH MA DEYNSAN KARAA?

Waad codsan kartaa in aad wax dheeraad ah deynsatid haddii

- aad horay u deynsatay lacag ka yar intii aad xaq u lahayd
- aad ka guureysid cid aad la degganeyd ama guri ay alaab tiillay oo aad u guureysid guri aysan alaab aallin
- uu canug qoyska Swiidhan ugu dhasho
- qof qaraabo dhaw ah, oo sidoo kale ku jiraya qaabilaadda qaxootiga ee degmada ama qaadanaya lacag sal-dhigasho, uu Swiidhan yimaado. Qaraabo dhaw waxaa lagu tiriyaa ninka, xaaska, cidda leysla wada noolyahay iyo carruur ka hooseysa 21 jir.

Haddii aad si wadajir ah ula deynsatid ninkaaga, naagtaada ama cidda aad wada nooshihiin waxaad si wadajir ah mas'uul uga noqoneysaan in aad deynka oo dhan isla dhiibtaan.

LACAGTA KHIDMADA EE ADEEGGA

Waxaa lacagta deynka si toos ah looga goynayaa lacagta khidmada ee adeegga oo ah 300 oo koron. Xagga deyn kordhinta lacagta khidmada adeeggu waa 100 koron.

SIDEE LACAGTA LEYSUGU SOO SHUBAYAA?

CSN-tu waxay lacagta soo marisaa Swedbank. Lacagta waxaa lagu dhiibi karaa *si jeeg ahaan ah ama akoonka ayaa lagu soo shubi karaa.* Waxay noqon kartaa koonto Swedbank ah ama bangi kale. *Si lacagta akoon laguugu soo shubo, waa in aad Swedbank la xiriirtaa oo aad u sheegtaa akoonka lacagta lagu soo shubayo.*

GOORMEE DEYNKA LA SOO CELINAYAA?

Waxaad billaabeysaa in aad deynka dhiibtid laba sano ka dib markii lacagta marki ugu horreysay laguu soo shubay. In deynka dib loo dhiibo waxay qaadaneysaa in u dhexeysa 1 iyo 7 sano haddii aad ku dhiibeysid si waafaqsan qorshaha dib u bixinta.

SIDEE LACAGTA DULSAARKA DEYNTA LOO XISAABINAYAA?

Lacagta dulsaarka waxaa tirinteeda si toos ah looga billaabayaa marki deynki ugu horreyay la soo shubay. Lacagta dulsaarka labada sano ee ugu horreysa waxaa daynka la dulsaarayaa maalinta aad billaabeysid in aad lacagta dhiibtid laba sano ka bacdi. Markaas ka dib lacagta dulsaarka ee aan joogsiga lahayn waxaa lagu qiyaasayaa lacagta deynka ah ee cusub. www.csn.se ayaad ka eegi kartaa inta lacagta dulsaarku ay sannad walba tahay. Lacagta dulsaarka waxaa go'ynaya xukuumadda.

CSN 4001i/1703

SIDEE AAN KU DHIIBAA?

Laba sano ka bacdi ayey CSN-tu kuu soo direysaa faatuurooyinka ugu horreeya. Caadi ahaan deynka waxaad bixineysaa bil walba. Inta aad dhiibeysid waxay ku xirantahay inta aad deynsatay. Haddii aadan waqti sax ah ku dhiibin waxaannu soo direynaa xasuusin.

MA DHIIBI KARAA LACAG DHEERAAD AH?

Haddii aad dooneysid waad billaabi kartaa in aad deynka dhiibtid inta lagu jiro labada sano ee ugu horreeya. Sidoo kale waad dhiibi kartaa lacago dheeraad ah si aad deynka dhakhsi isaga dhiibtid.

MAXAAN SAMEYNAYAA HADDII AANAN DHIIBI KARIN?

Haddii aadan dhiibi karin iyadoo ay sababtu tahay in uu dakhligaagu hooseeyo, waxaad codsan kartaa in aad in yar dhiibtid (lacag dhiibis hoos loo dhigay) ama in aad lacag dhiibidda u kaadisid (dib u dhigis). Waa weyninka qoyska iyo dakhliga sannadkii ah waxa go'aaminaya haddii aad lacag dhiibidda hoos u dhigi kartid ama dib u dhigi kartid. Halki go'aanba wuxuu shaqeynayaa hal sano oo goonidiis ah. Lacagta dulsaarku wey soconeysaa xitaa haddii aadan lacag bixineynin. Deynkaagu sidaas darteed wuu kordhayaa haddii aad dib u dhigatid lacag dhiibidda. Haddii aadan Swiidhan degganeyn xeerar kale ayaa khuseeya dib u dhigashada. CSN-ta ayaa ka warrami karta wixii dheeraad ah oo ku aaddan xeerarka.

DEYNKA MA LEYSKA DHAAFI KARAA?

Deynka waa leyska dhaafi karaa gebi ahaanba haddii CSN-tu ay u aragto in aadan waqtiga fog lahayn awood aad deynka dib ugu bixisid. Waxay tusaale ahaan ku xirnaan kartaa cudur joogto ah ama da'da oo aad u weyn oo ay la socoto dakhli hooseeya. Marka la dhinto si ootomaatik ah ayaa deynka leysaga cafinayaa.

BAR INTARNEET

www.csn.se ayey macluumaad dheeraad ah oo ku aaddan deynka guri alaab dhigashadu ku jiraan.

CINWAAN BEDDELASHO

Haddii aad gudaha Swiidhan ku guurtid cinwaanka cusub waa in diiwangelinta dad weynaha lagu wargeliyaa. Wey fiicantahay haddii aad xitaa CSN ku wargelisid. Cinwaan cusub oo dibadda ah waa in aad toos CSN ugu wargelisaa. Kaar cinwaan waxaa laga dalban karaa CSN.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Macluumaad dheeraad ah waxaa bixinaya CSN, Hemutrustningslån,
851 82 SUNDSVALL
Taleefan: 0771-276 100
Waqti talefoon: 9.00–12.00
Telefax: 060-18 60 06
E-mail: hemutrustningslan@csn.se
Bar intarneet: www.csn.se

Warqaddan macluumaadka rasmiga ah waxay taalla iyadoo u turjuman Carabi, Ingiriis, Faransiis, Kurmanji, Baashtuu, Af-iiraani, Af-ruush Af-Soomaali, Soraani, Af-tigree. Xagga turjumidda Semantix ayaa mas'uuliyaddeeda leh.